



Marka La Igu Xukumo In Aan Bixiyo Lacagta Daryeelka Caruurta

Now That I Have a Child Support Order

Maxaan yeelayaa ka dib marka uu amarku i soo gaaro?

Degmo kasta waxa ay leedahay xafiis qaabilsan lacagta daryeelka caruurta (Child support). Xafiiska waxaa lagu magaacaabaa xafiiska IV-D (“Four D Unit”). Haddii aad gargaar ka hesho Barnaamijka Gargaarka Qoyska ee:

- Minnesota Family Investment program (MFIP)
- Medical Assistance, ama
- Gargaarka Haynta ilmaha

Qaybta IV-D (IV-D Unit) iskeed ayey u bilowdaa kiis masaariifta ilmaha ah si ay uga soo qaado masaariifta ilmaha waalidka ilmaha haye ma ahee kan kale.

Haddii aan lagu siin gargaarka, waa in aad caawinaad ka **codsataa** Xafiiska IV-D. Xafiisku kuma caawinayo haddii aadan codsan. Xafiiska IV-D waxaa waajib ku ah inuu ku caawiyo si lagu siiyo lacagta taageerada caruurta. Si aad u hesho adeegga la xiriir [xafiiska lacagta daryeelka caruurta \(Child support\)](#).



Soo booqo <https://mn.gov/dhs>.

- Guji “People We Serve” (*Dadka Aan U Adeegno*)
- Guji “Children and Families” (*Caruurta iyo Qoysaska*)
- Guji “Services” (*Adeegga*)
- Guji “Child Support” (*Lacagta daryeelka caruurta*)
- Guji “Contact Us” (*Nagala soo xiriir*)
- Guji “Contact your county or Tribal child support office” (*xafiiska lacagta daryeelka caruurta*) ka dibna raadi magaca degmada

Goorma ayey ii bilaabanaysaa in la i siiyo lacagta daryeelka caruurta?

Waxa ay qaadan kartaa ilaa 3 bilood ka hor inta aanu kuu bilaaban lacagta daryeelka caruurta. Haddii aad heysato amar maxkamdeed oo amraya in waalidka kale lacag bixiyo, oo aad caawinaad ka codsatay IV-D si ay lacagta kuugu soo ururiyaan, waxa ay gal kuugu furayaan ilaa 20 cisho. Waxa ay heystaan ilaa 15 cisho in ay gaarsiyaan goobta shaqada ee waalidka kale si lacag looga soo jaro.

Loo shaqeyaha waa inuu ka jaraa mushaharka shaqaalaha 14 cisho gudahood laga bilaabo marka uu soo gaaro amarka lacagta daryeelka caruurta oo lacagtaas u soo diraa Xafiiska IV-7 cisho gudahood ka dib. Ka dib Xafiiska IV-D waa in 2cisho gudahood kuugu soo diraan lacagta daryeelka caruurta.

Haddii aad qaadato gargaarka MFIP, waxaa lagu siinayaa lacagta daryeelka caruurta, MFIP lacagta caddaanka ah waa layreynayaa 2 bilood.

Waxa aad qaadan kartaa lacagta daryeelka caruurta ilaa \$100 bishiiba iyo ilaa \$200 bishiiba haddii aad heysato 2 caruur ah ama ka badan iyada oo aan la yareyn MFIP.

Haddii aad qaadato MFIP, gargaarka heynta caruurta ee degmada, ama gargaarka Caafimaadka (Ceymiska) (MA), IV-D waxa ay kaa reebeysaa qeyb ka mid ah lacagta daryeelka caruurta si loogu bixiyo lacagta heynta caruurta iyo kaarka caafimaadka.

Haddii aadan qaadan MFIP, gargaarka heynta caruurta, ama MA, Xafiiska IV-D waxa ay kaa goynayaan 2% oo lacagta ay ka soo jaraan waalidka kale oo ah kharashka maamulka waxaana suurogal ah in lagaa qaado lacag sanadle ah oo dhan \$25.00.

Sidee ayaan ku ogaanayaa haddii xafiiska IV-D uu gal lacagta daryeelka caruurta iiga furan yahay?

Minnesota waxa ay leedahay xafiis ka caawiya dadka helida masaariifta ilmaha iyo shabakad (website) laga eegi karo lacagaha. Waxa aad soo wici kartaa xafiiskaa Isniinta ilaa iyo Jimcaha laga bilaabo 8 subaxnimo ilaa iyo ilaa 4 :30 galabnimo.

Xafiiska Caawintu waalidka waxa uu kuu sheegi karaa:

- Taariikhdiis ugu dambeysay ee la bixiyey lacagta daryeelka caruurta.
- Lacagtiis la bixiyey 90 maalmood ee ugu dambeeyey.
- Lacagta lagu leeyahay waalidka kale iyo
- Magaca iyo telefoonka qofka shaqaalaha ee dawcadaada gacanta ku haya



Soo wac:

- Magaaloyinka mataanaha ah [\(651\) 431-4400](tel:6514314400)
- Gobolka Minnesota oo dhan [\(800\)-657-3890](tel:8006573890)
- Haddii aad dhaga la' dahay ama aad dhago culus tahay, garaac 711 si aad u hesho adeega gudbinta ah ee TTY ee MN ama aad u isticmaasho adeega gudbinta ah ee aad jeceshahay.

Ama soo booqo: www.childsupport.dhs.state.mn.us/Action/Welcome

Ma isbedeli kartaa lacagta daryeelka caruurta?

Haa. Lacagta daryeelka caruurta waa ay isbedeli kartaa haddii dhaqaalaha ama baahida caruurta ay isbedesho oo amarkii hore uu ekaanayo mid aan cadaalad aheyn Amar maxkamadeed ayaa loo baahan yahay si wax loo wax looga bedelo masaariifta ilmaha. Sidoo kale, waxaa kale oo ka dhigi kartaa mid la socdo kororka kharashka ku baxa nolol maalmeedka 2dii sano ee kasta. Ma dhaqan gelin kartid heshiis lacagta daryeelka caruurta ilaa ay dhinaca kale ay maxkamaddu amarto.

Maxaa la iiga baahan yahay in aan soo bandhigo si wax looga bedelo lacagta daryeelka caruurta?

Minnesota waxa ay leedahay sharciyo u gaar ah oo ku saabsan lacagta daryeelka caruurta. Sharciyadaas waa kuwo ku saleysan wadaagga dakhliga. Wadaagga dakhliga waxaa lacagta daryeelka caruurta la tixgeliyaa wadarta dakhliga soo gala **labada** waalidka. Dakhliga guud waxaa loola jeedaa lacagta shaqada kaa soo gasha inta aan canshuurta laga jarin.

Waalidka doonaya inuu bedelo lacagta masaariifta ee ilmaha waa khasab inuu cadeeyo in wax weyni is bedeleen ilaa xilligii amarkii ugu dambeeyey la soo saaray. Iyo in isbedelkaasi uu ka dhigay in loo baahan yahay in wax laga bedelo masaariifta ilmaha. Isbedeladaa waaweyni waxa ay noqon karaan:

- Isbedel balaaran oo ku yimaada dakhliga ama baahida mid ka mid ah labada waalid.
- Isbedel balaaran oo ku yimaada baahida caruurta.
- Gargaarka dadweynaha oo uu qaato.
- Kharashka caafimaadka ilmaha oo kordhay
- Kharashka ilmaha lagu hayo oo isbedelay ama bixinta kharashyadda daryeelka caafimaad ee ilmaha
- Ilmahu waa uu ka weyn yahay 18 jir mana dhigto dugsi sare/tacliin kale



Maxkamaddu ma bedeleyso amarka maxkamadda ee lacagta daryeelka caruurta haddii aanay kordhin ama hoos u dhicin ugu yaraan 20% iyo \$75.

Sidee ayaan ku ogaanayaa haddii uu waalidka dakhliga fara badan soo galo?

Xeerarka masaariifta ilmaha waxa ay yiraahdaan labadda midkii raba ayaa ka waydiisan kara kan kale nuqul (copy) ah canshuur celintiisa. Waxa ay u baahan tahay taasi inay lilaahi ka tahay qofka codanaya aysana ka badnaan hal mar 2 sannaba. Kolka aad waydiisato waalidka kale, waxa uu haystaa 30 cisho oo uu kugu siiyo. Haddii uusan kugu siin, la hadal hawl-wadeenkaaga. Waxaa dhici karta inay jiraan dukumiintiyada kale oo aad waydiisan karto waalidka kale iyana. Kala hadal hawl-wadeenkaaga kuwaa.

Sidee ayaan ku ogaadaa korodhka sicirka nolosha?

Dhamaan amarada lacagta daryeelka caruurta waxaa ku qoran isbedelka maciishadda (COLAs). Taasi waaxa ay ka dhigan tahay in lacagta lagu siiyo ay mararka qaarkood kordhi karto. Haddii aan waalidka kale dakhligiisu kordhin ama aysan ku xusneyn in si caadi ah lacagta loo kordhiyo, maxkamaddu waxa ay u tixgelin kartaa xaalad gaar ah.

Tirada COLA ee lakordhiyo waa mid ku xiran sicir bararka. Waxaa laga yaabaa in la kordhiyo mar 2dii sanaba. Haddii xafiiska IV-D kula shaqeynayaan waxaa laga yaabaa in ay si toos ah u kordhiyaan. Haddii xafiis IV-D kula shaqeynayo, waxaa lagaa doonayaa in aad maxkamadda tagto si loo kordhiyo.

Intee goor ayey dib u eegaan amarkayga masaariifta ilmaha?


Haddii uu leeyahay adeegyadda IV-D kiiska masaariifta ee ilmahaagu, xafiiska IV-D waa in ay dib u eegaan amarka lacagta daryeelka caruurta hal mar sadexd sano ee kasta. Waxa aad weydiisan

kartaa in wax laga bedelo lacagta daryeelka caruurta hadii uu amarku yahay mid sadex sano ka yar, laakiin xafiiska IV-D waajib kuma aha in ay ku caawiyaan.

Sidee ayaan ku codsan karaa in wax laga bedelo lacagta daryeelka caruurta?

Si wax looga bedelo lacagta taageerada caruurta, weydii shaqaalaha kula shaqeeya Dadajinta Nidaamka Lacagta Daryeelka Caruurta. Waxa ay ka caawisaa in waalidintu ay iska fahmaan dhibaatooyinka la xiriira lacagta daryeelka caruurta.

- Waraaq u soo qor shaqaalaha lacagta daryeelka caruurta oo weydiiso in wax laga bedelo amarka maxkamadda. Waxaa jira foom ku lifaaqan xogta urursan. Nuqul (koobi) ka reebo.
- Xafiiska IV-D waxa ay bilaabayaana dacwadaada ama waxa ay ku soo dirayaan waraaq “diidmo” oo ay kuugu sheegayaan in aysan ku caawin karin.
- Haddii xafiiska IV-D ku diidaan, weli iskaa waad u tagi kartaa maxkamadda waydiina kartaa inay bedelaan cadadka masaariifta ilmaha ah ee aad bixiso.
- Haddii uu qaybta IV-D uu aqbalu kiiskaaga, iyaga ayaa diyaarinaya warqadaha lagu codsanayo wax ka bedelida masaariifta ilmaha, una geynaya waalidka kale, kana xareynaya maxkamadda. Haddii uusan waalidka kale diidaneyn ama codso 14 cisho in lagu qabto dhageysiga, lacagta daryeelka caruurta waa la bedeli karaa.
- Haddii aan la heyn macluumaad ku filan, ama waalidka kale uusan diidaneyn, waxaa la qabanayaa dhageysiga.



In xafiiska IV-D la maro oo kaliya miyaa wax looga bedeli karaa lacagta daryeelka caruurta?

Maya. Maxkamadi waa ay bedeli kartaa masaariifta ilmaha mar walba oo ay qaadayso dacwo la xiriirta haysashada ilmaha, waqtiga ilmaha la tusayo waalidka kale (booqashada), qaybinta hantidda, ama gacan-qaadyada qoyska dhexdiisa ka dhaca. Waa aad codsan kartaa isbedel in lagu sameeyo cadadka masaariifta ilmaha.

Maxaa dhacaya dhageysiga?


Labada waalid waxa ay soo bandhigaan dakhliga iyo kharashka ku baxa. Maxkamaddu waxa ay soo saartaa amar. Haddii labada waalid aanu midna ogoleyn, waxa ay diiwaan gelin karaan codsi dib loo eego 20 cisho gudahood ka dib marka amarku soo gaaro. Haddii ay labada waalid ogol yihiin go'aanka maxkamadda, xafiiska IV-D ayaa ka shaqeeya sida lacagta lagu bixin lahaa.

Maxaan u baahanahay dhageysiga?

Waxaa laga yaabaa in aad qareen u baahan tahay, laakiin kaligaa waad tagi kartaa maxkamadda. Shaqaale ka socda xafiiska IV-D ayaa imanaya dhageysiga oo weydiinaya lacagta loo jaro laakiin xafiiska IV-D adiga kuma matalo.

Waxa aad u baahan tahay foomamka. Waxa aad weydiisan kartaa maxkamadda. Waxaa laga yaabaa in lacag laga qaado. Waxaa jira sidoo kale habab kale foomka oo interneka loogala soo bixi karo.

Waxaad ka heli kartaa [wargadaha aad u baahan tahay](http://www.mncourts.gov) bogga internetka ee maxkamadda: www.mncourts.gov.



- Guji “Forms & Instructions” (*La Soo Bax Foomamka*)
- Guji “Child Support” (*Lacagta daryeelka caruurta*)
- Click on “Expedited Process Forms” (*Foomamka Habka Dedgeg ah*)
- Guji “Motion to Modify Child Support” [packet] (*Codsiga Wax ka Bedelidda*) [xirmo]

Waa in aad akhrisaa tilmaamaha, si aad u ogaato nooca foomka aad u baahan tahay. Si aadan dhib ula kulmin, guji mareegta foomka oo dooro “save as” si aad ugu dajiso kombiyuutarkaaga.

Fiiro gaar ah: Taageerada kharashka caafimaadka waa wax xilli kasta dib loo eegi karo haddii baahida ceymiska caafimaadka ee ilmaha ay isbedesho ama shuruudaha ku xiran ceymiska ilmaha.



Sidee ayaan ku xaqiijin kartaa in aan helo lacagta laga soo qaado waalidka kale?

Shaqaalaha u gudbi **dhamaan** macluumaadka aad ka ogsoon tahay waalidka kale. Tusaale ahaan, haddii aad in waalidka kale uu shaqada bedeshay ama guuray, gaarsii shaqaalaha sida ugu dhaqsaha badan.

Maxaan yeelayaa haddii waalidka kale uusan lacagta bixin?

Lacagta daryeelka caruurta looma aqoonsado wax aan la bixin ilaa 31 maalmood ka soo wareegto. Xafiiska IV-D waxa uu qaban karaa dhawr shay oo kaa caawin kara in aad lacagta hesho.

- **Lacag ka jarid toos ah.** Haddii amarka lacagta daryeelka caruurta aysan ku cadeyn in laga jaro jeegga waalidka kale, waxa aad weydiisan kartaa in laga soo jarojeegga waalidka kale marka ugu horeysa oo 31 maalmood la daaho.
- **Fulin la'aanta amarka maxkamadda.** Waxa aad waydiisan kartaa in maxkamaddu ay ku hesho dambi yasid maxkamad ah haddii 3 bilood ama ka badan aan la bixin masaariifta ilmaha. Waa inuu jiraa dhageysi maxkamadeed. Haddii ay maxkamaddu go'aan ku gaarto in waalidka kale laga doonayey in uu bixiyo lacagta daryeelka caruurta, laakiin uusan bixin waxaa lagugu qaadi karaa in aadan fulin amarka maxkamadda. Haddii uusan waalidka kale bixin lacagta daryeelka caruurta, waxaa loo diri karaa xabsi ama waxaa la amri karaa inay soo gutaan u adeegid bulsho.
- **Canshuur Celinta** Haddii waalidka kale lagu leeyahay \$500 oo lacagta daryeelka caruurta oo ku baaqatay, canshuurta uga soo noqota dawladda dhexe iyo gobolka ayaa laga qaadan karaa si loo bixiyo lacagta daryeelka caruurta. Haddii waalidka kale lagu leeyahay wax ka badan 1 bil oo lacagta daryeelka caruurta ah, canshuurta u soo noqoto ayaa laga bixinayaa.

- **Ka joojinta wadista gaariga** Marka waalidka kale lagu yeesho ugu yaraan 3jeer taageerada lacagta daryeelka caruurta ee bil kasta, gobolka ayaa ka joojiya ogolaashaha (leesinka). Waxa uu noqon karaa leesinka gawaaarida, ama leesinka shaqada ee gobolku siiyey, sida timo jarayaasha, ama leesinka goobaha dadka lagu qurxiyo.

Leesinka waa laga joojiyaa ilaa uu bilbaabo bixinta lacagta daryeelka caruurta. Waxa kale oo gobolku ka joojin karaa leesinka ugaarsashada, kaluumeysiga, doomaha iyo leesinada kale.

- **Warbixinta deyn qaadashada** Xafiiska IV-D waxa ay warbixinta waalidka aan bixin lacagta daryeelka caruurta u gudbin karaan xafiisyada warbixinta deyn qaadashada.
- **Rahmad** Xafiiska IV-D waxaa waajib ku ah in ay rahmad dulsaaraan hantida ma guurtada ah ee guryaha ama hantida qofka (gawaaarida, doomaha, iwm) ee waalidka aan bixin lacagta daryeelka caruurta. Haddii guriga rahmad la dul dhigay, ama hanti kale, lama iibin kaaro ilaa rahmadda laga dul qaado.

Marka ugu horeysa oo maxkamaddu goyso lacagta daryeelka caruurta, waxa aad ka codsan kartaa in la qabto dhageysi lagu xaqiijinayo in waalidku bixiyo lacagta daryeelka caruurta. Waxa aad dhageysiga codsan kartaa oo kaliya lixda bilood ee ugu horeysa amarka ugu horeeya. Maxkamaddu waxa ay amarka ku lifaaqeysaa foomka aad ku codsan karto dhageysiga. Waa in aad buuxisaa foomka oo aad dib ugu soo dirtaa maxkamadda iyo dhinaca codsanaya dhageysiga.

Maxaan yeelayaa haddii aan ka cabanayo xafiiska IV-D?

- Waraaq u qor madaxa xafiiska xafiiska qaabilsa lacagta daryeelka caruurta (IV-D) La socodsii waxyaabaha aad ka tirsaneyso xafiiska IV-D iyo sababta aad ugu heysato in ay taasi khalad tahay. **Soo raaci cinwaankaaga, taariikhda, iyo lambarka dacwadda. Nuqul (koobi) ka reebo warqadda. Haddii aad degan tahay degmada Hennepin, waxa aad la xiriiri kartaa U doodaha Macaamiisha ee 612-348-3333.**
- Haddii aysan kugu soo warcelin ama aysan wax uga qaban dhibka 30-cisho gudahood, wac khadka [\(651\) 431-4400](tel:6514314400) ama warqad u qor unuguna dir ciwaanka ah:
DHS: Child Support Division
P.O. Box 64946
St. Paul, MN 55164-0946
- Haddii aanay taasi waxba bedelin, waraaq u soo qor:
Administration for Children and Families
77 West Jackson Blvd
Chicago, IL 60604

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambaysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.

CHANGE IN CHILD SUPPORT LETTER

(Warqadda Lagu Codsado Wax Ka Bedelka Lacagta Daryeelka Caruurta)

Child support worker's name
(Magaca shaqaalaha kaa caawinaya lacagta daryeelka caruurta)

Date: _____
(Taariikh)

Child Support Worker's address (Cinwaanka shaqaalaha kaa caawinaya lacagta daryeelka Caruurta)

RE: _____
(Ujeedo) your file number
(Gal Lambar)

Dear: _____
(Marwada sharafta leh)

I have a child support order that _____
(Waxaa jira amar lacagta daryeelka caruurta loo jaro oo faraya) name of other parent (Magaca waalidka kale)

is to pay me _____ per month.
(inuu i siiyo _____ (tirada lacagta daryeelka caruurta) bil kata.

S/he should pay more child support because:
(waxaa aan doonayaa in laga soo qaado lacag dheerad ah waayo)

(add the facts of your case here, such as, "I hear he got a raise", "She got a new job", "My expenses went up", or "My income went down")
(halkan waxyaabaha dheeraadka ah ee aad ogtahay, sida "waxa aan maqlay in loo kordhiyey lacagtauu ku shaqeeyo", "waxa uu helay shaqo cudub", "Kharashkayga ayaa krdhay", ama "Dakhligeyga ayaa yaraaday")

I ask you to start the Expedited Child Support Process to review my child support order. Please contact me at the address and number below. Thank you.

(Waxa aan kaa codsanayaa in aad bilowdo nidaamka Dadajinta Lacagta Daryeelka Caruurta si dib loogu eego amarka maxkamadda)

Your name (Magacaaga)

Your address (Cinwaankaaga)

Your phone number (Telefoon Lambarkaaga)